## BAYAANKA TAKOORID LA'AANTA

Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxay bixiyaan fursado waxbarasho iyo shaqo loo siman yahay, barnaamijyada iyo dhacdooyinkana qofna ma takooraan marka la eego xag jinsi; qolo; caqiido; midab; diin; qabiil; meeshaad kasoo jeedo; da; dhaqaale; cidaad jeceshahay; oo ay ku jiraan hadalka labka ama dhediga ama aqoonsiga; uur; guur; muuqaal guud; laxaad li'i xaga maskaxda ama jidhka; siduu ciidamada uga ruqsaystay ama darajada ciidamada; ama isticmaalka ey ama xawayaan haga. Dugsiyada Dadwaynaha waxa kale oo y si loo siman yahay u bixiyaan Boy Scouts iyo ururada kale ee kooxaha dhalinyarta loo qoondeeyey .

### Waa maxay takooridu?

Takooridu waa cadaalad daro lagula dhaqmo qof ama koox sababtoo ah waxay ka tirsan yihiin koox gaara, oo loo aqoonsan yahay dabaqad la ilaaliyo. Takoorida waxaa ka mida tiiyoo qofka si gooniya loola dhaqmo ama loogu diido barnaamij, adeeg ama ciyaar sababtoo ah waxay ka tirsan yihiin dabaqad la ilaaliyo, ama tiiyoon qofka laxaadkala baahidiisa la daboolin. Dhibaatada takooridu waxay noqon kartaa hadal ama jidh dil loo gaysto dabaqad la ilaaliyo.

### Waa maxay dabaqada la ilaaliyaa?

Dabaqada la ilaaliyaa waa koox dada oo wadaaga sifooyin lagana ilaaliyo in lagula kaco takoorid ama dhibaato tiiyoo la raacayo xeerarka dawlada dhexe, gobolka ama degmooyinka. Dabaqadaha la ilaaliyo ee Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waa kooxaha lagu xusay Bayaanka Takooridla'aanta ee kor ku xusan sida jinsi, qolo ama wixii la mida.

### Sideen u gudbiyaa dacwo ku saabsan takoorida?

Hadii aad rumaysan tahay in adiga ama ilmahaaga lagula kacay takoorid ama dhibaato taroorida dugsiga dhexdiisa waxaad xaq u leedahay inaad dacwo rasmiya kasoo gudbiso. Nuqul buuxa oo ka hadlaya xeerka dacwada takoorid la'aanta ee degmada ka soo codso Xafiiska Xuquuqda Ardayda (206) 252-0367 ama OSCR@seattleschools.org ama ka fiirso:
http://www.seattleschools.org/UserFiles/Servers/Server_543/File/District/Departments/School%20Board/Procedures/Series%203000/3210SP.B.pdf

Kahor intaanad dacwada soo gudbin waxaad cabashadaada kala hadli kartaa maamulaha dugsiga ilmahaagu dhigto, xeerbeegtiga Dugsiyada Dadwaynaha Seattle ka soo wac (206) 252-0529. Tani waa sida ugu dhakhsaha badan ee inta badan lagu xaliyo cabashooyinka.

Ardayda, waalidka, masuuliyiinta iyo xubnaha kale ee bulshadu waxay lasoo xidhiidhi karaan Xafiiska Xuquuqda Ardayda oo loo xilsaaray inay xaliyaan su'aalaha iyo cabashooyinka takoorida ee Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxaanad kala soo xidhiidhi kartaa 206-252-0306 ama **oscr@seattleschools.org** ama Seattle Public Schools, MS 32-149, P.O. Box 34165, Seattle, WA 98124-1166. Waxa kale oo aad lasoo xidhiidhi kartaa:

- Isku duwaha Title IX cabashooyinka takoorida jinsiga iyo dhibaatooyinka kala soo xidhiidh 206-252-0367 ama **Title.IX@seattleschools.org**
- ADA/Section 504 Isku duwaha cabashooyinka takoorida dadka laxaadkala' kala soo xidhiidh 206-252-0178 ama **accessibility@seattleschools.org**

Su'aalaha ku saabsan shaqaalaha ama dalbashada u gargaarka laxaadla'aha ama cabashooyinka ku saabsan takoorida sida dhibaatada xaga jinsiga lasoo xidhiidh: Kalkaaliyaha Kormeeraha Shaqaalaha 206-252-0024 ama **hreeoc@seattleschools.org** ama Seattle Public Schools, Mailstop 33-157, P.O. Box 34165, Seattle, WA 98124-1166.

# HABKA DACWADA TAKOORKA

## Step 1: Dacwada ku wajahan xafiiska waxbarashada degmada

Inta badan dacwada waa in lagu soo gudbiyaa hal sano gudahood marka laga bilaabo taariikhda ay takooridu dhacday. Dacwadu waa inay ahaataa qoraal, sharaxdaana waxa dhacay iyo sababta aad ugu malaysay inay tahay takoorid. Waxa kale oo wanaagsan inaad kusoo qorto talaabada aad rabto inay degmadu qaado si ay u xaliso dacwadaada. Dacwooyinka qaar waxaa laga yaabaa inaan loo tixgelin inay dhamaystiran yihiin ilaa aan kaa helayno arjiga ogolaanshaha oo saxeexan noona ogolaato inaanu baafino magacaaga si aan u baadhno dacwadaada. Dacwada waxaa lagu soo gudbin karaa boosta, email, ama waxaa gacanta looga saari karaa degmada ama maamulka dugsiga, Xafiiska Xaquuqda ardayda ama xafiiska shaqaalaha.

Marka dugsigu helo dacwadaada qoraalka ah, waxaa lagu siin doonaa nuqul qoraala oo ah habka degmadu u xaliso dacwada takoorka. Ka bacdina xafiiska xaquuqda ardayda ama xafiiska shaqaaluhu waxay xaqiijin doonaan in xafiiska waxbarashada degmadu degdeg u bilaabaan baadhitaan buuxa. Waxa kale oo aad codsan kartaa in dacwadaada la xaliyo tiiyoon baadhitaan buuxa la samayn.

Xafiiska waxbarashada degmadu waa inuu qoraalkaaga kaga soo jawaabaa 30 maalmood gudahood markay dacwadaada helaan, tiiyoo aad adigu maalin kale codsato ama ay timaado xaalad suurto galinaysa in wakhtiga la dheereeyo mooyaane. Hadii jawaabtu qaadato in ka badan 30 cisho waxaa qoraal laguugu soo sheegi doonaa sababta ay u dheeraatay iyo taariikhda la filayo in laguu soo jawaabo.

Marka xafiiska waxbarashada degmadu ka soo jawaabo dacwadaada, jawaabta waa inay la socdaan

1. Qoraal kooban oo ku saabsan natiijada baadhitaanka dacwada;
2. Inay degmadu ka baaqatay inay buuxiso xuquuqdaada la xidhiidha dacwadaada iyo in kale;
3. Ogaysiin ku saabsan xaqa aad u leedahay inaad racfaan qaadato, cidaad u qaadan karto iyo meeshaad ku hagaajin karto racfaanka; iyo
4. Wixii talaabo ah ee aan qaadayno si aan u saxno wixii xeerar ah ee aanaan sidooda ugu dhaqmin.

## Step 2: Racfaanka ku wajahan xafiiska guddida maamulka dugsiyada

Hadii aanad ku qancin go'aanka xafiiska waxbarashada degmada waxaad racfaan u qaadan kartaa guddida maamulka dugsiyada. Waa inaad qoraalka racfaanka ugu soo gudbisaa xafiiska xog hayaha guddida maaulka dugsiyada 10 cisho gudahood markaad jawaabta xafiiska waxbarashada degmada hesho.

Guddida maamulka dugsiyadu markay racfaankaaga helaan 20 cisho gudahood ayay dacwadaada qaadi doonaan, adigoo wakhti kale codsada mooyaane. Dhegaysiga dacwadaada waxaad keeni kartaa markhaatiyo ama warbixino la xidhiidha racfaankaaga.

Guddida maamulka dugsiyadu waxay go'aankooda qoraal kuugu soo diridoonaan 30 cisho ka dib markay helaan racfaankaaga. Go'aanka guddida maalmulka dugsiyada waxaa la soo raacin doonaa warbixino ku saabsan sidaad dacwad uga furan karto xafiiska maamulaha guud ee waxbarashada gobolka OSPI.

## Step 3: Dacwad ku wajahan xafiiska maamulaha guud ee waxbarashada gobolka OSPI

Hadii aanad ku qancin go'aanka racfaanka guddida maamulka dugsiyda waxaad dacwad u qoran kartaa xafiiska maamulaha guud ee waxbarashada gobolka (OSPI). Waa inaad dacwada ugu gudbisaa xafiiska OSPI ka 20 cisho gudahood markaad hesho go'aanka racfaanka degmada ka dib. Waxaad dacwada OSPI ugu diri kartaa email: Equity@k12.wa.us; fax: (360) 664-2967; ama boosta: OSPI Equity and Civil Rights Office, PO Box 47200, Olympia, WA 98504-7200.